# Xuquuqda Aad Leedahaya Dib U Qaadashada

Your Rights in Repossession

## Waa maxay deyn bixiye?

Deyn bixiyaha waa qof ama goob ganacsi oo deyn kugu leh. Tusaale ahaan, haddii aad gaari iibsato oo aad shirkadda aad ka iibsatay aad siiso lacag bil kasta, shirkadda ayaa kuu ah deyn bixiyaha.

## Goorma ayaa shirkada aan gaariga ka iibsaday dib u qaadan kartaa gaariga?

- Deyn bixiyuhu waa inuu heystaa warqadaha, inta amaah aad adigu saxiixday, taasoo lagu tilmaamayo hantida oo xaq u siineysa deyn bixiyaha inuu la wareegi karo haddii aadan bixin deynta (adiga oo ka soo bixi waayey). Hantidu waa "rahmad" taasoo deyn bixyuhu **ku leeyahay xuquuq.**

- In toos loo qato waxa ay ku iman kartaa haddii aadan wada bixin lacagt, la daahdo ama adan qeyb ahaan bixin. Laakiin waxa ay sidoo kale noqon kartaa in aad jabisay qodobo kale oo heshiiska ka mid ah - tusaale ahaan, haddii aadan laheyn ceymiska gaariga oo heshiisku ahaa in aad leedahay ceymiska gaariga.

- In aad bixisay **qeyb ka mid ah** deynta ma joojineyso in dib loola wareego hantida - ilaa aad la gasho heshiis cusub oo qoraal ah deyn bixiyaha. Laakiin haddii uu deyn bixiyaha si joogta ah u ogolaado dib u dhaca ama bixinta qeyb ka mid ah bixinta lacagta oo aysan kuu sheegin in ay la wareegayaan, waxaa **laga yaabaa** in ay ka haraan xaqa ay dib ugu soo ceshanayaan.



- Haddii aad diiwaangelisay ceyroobid, deyn bixiyuhu ma qaadan karo hantidaada ilaa uu heysto ogolaashaha maxkamadda.

## Waa maxay hantida uu deyn bixiyuhu dib u qaadan karo?

- Deyn bixiyuhu waxa uu dib u qaadan karaa kaliya waxyaabaha ku xusan heshiiska aad gaarteen. Tusaale ahaan ma qaadan karaan telefishinka saaran gaari ay kaala noqdeen. Haddii ay qaataan waxyaabo dheeraad ah oo aanay kuu soo celin, u dir waraaq markiiba aad ku codsaneyso in ay kuu soo celiyaan. Nuqul (koobi) ka reebo warqadda. Dacwad ayaad ku furi kartaa si ay kuugu soo celiyaan.

- Hanti aad leedahay ma qaadan karaan, ilaa aad deynta aad ka qaadatay aadku iibsatay hantidaas. Tusaale ahaan, dharka dhamaan xubnaha qoyskaaga, cuntada, alaabada, maacuunka, iyo saacad qaali ah oo sharcigu ilaaliyey.

- $10,800 ugu horeeya ee alaabada qoyska, qalabka guriga, qalabka miyuusigga, raadiyaha, iyo TVga dhamaan waa alaabada sharcigu ilaaliyey haddii aanay qeyb ka aheyn alaabada deynta lagu iibsaday. Laakiin haddii aad dukaanka kaga iibsatay kaarka oo aadan bixin biilasha, waxaa suurogal in dukaanku kaala noqon akro alaabada.

## Waa maxay dariiqada ay shirkadaha deyntu isticmaalaan si ay alaabada dib ugu ceshtaan?

- Deyn bixiyuhu waxa uu caawinaad ka heli karaa xarumaha dadka caawiya ee maxkamadda. Waxa ay dib u ceshan karaan hantida iyaga oo aan heysan amar maxkamadeed ama sheriifka haddii aanay cidna ku keeneyn "qalaalse nabadgelyada ah." Taasi waxa ay ka dhigan tahay waxa ay weydiisan karaan hantida, haddii aadan ogolaan in aad siiso, waa in ay ka noqdaan. Haddii aadan halkaas joogin si aad u diido, way ka noqon karaan hantida. Laakiin ma jabin karaan gurigaaga ama garashkaaga. Tusaale ahaan, gaarigaaga way ka jiidan karaan wadada garaashka soo gasha ama gurigaaga hortiisa iska imaad la'aan.

**AMA**

- Waxa ay maxakamadda ka diiwaan gelin karaan dacwad maxkamadeed lagu magacaabo "dib u soo cesasho". Dib u soo cesashada, sheriifka ayaa hantida soo celiya isaga oo raacaya amarka maxkamadda. Waa in aad raacdaa amarka sheriifka. Haddii aad aaminsan tahay in uu dib u ceshadku tahay mid khalad ah, waxa aad maxkamadda ka diiwaan gelin kartaa amar maxkamadeed oo aad ku weydiisneyso in hantida dib laguugu soo celiyo.

## Maxaan yeelayaa haddii uu deyn bixiyuhu igu handado inuu dib iiga qaadanayo?



- Haddii ay suurogal tahay, la tasho qareen. Qareeenka ayaa eegi kara warqadaha deynta si uu ogaado in deyn bixiyuhu dhab ahaantii xaq u leeyahay inuu dib u ceshan karo alaabada. Haddii ay jiraan deymo kale, waa in aad ka fikirtaa qorshe guud - sida in aad sameyso qorshe aad lacagta tartiib tartiib ugu bixiso ama aad maxkamadda ka diiwaan geliso in aad ceyroowday.

- Xusuusnoow in aad ka gorgortami **karto** deyn bixiyaha. Dib u qaadashada lacag fara badan ayaa ku baxda Dib uma qaataan alaabada haddii ay lacagta heli karaan. Waxaa suurogal ah in aad sameyn karto qorshe aad lacagta tartiib tartiib ugu bixiso oo adiga kuu wanaagsan. **Ha iska indho tarin dhibaatada.** La hadal oo isku day in aad heshiis qoraal ah la gaarto.

## Miyaan u ogolaadaa in ay dib u qaataan?

Waa in aad dhinaca wanaagsan iyo dhinaca xun ka eegtaa dacwadaada.

- **Dhinaca wanaagsan** – hantida oo aad dib u siiso waxaa laga yaabaa in lacag kuugu baaqato xilliga dheer. Lacag yaraa ayaa kaga baxda in ay dib kuugu celiyaan iyaga oo si fudud ku iibin kara. taasi waxa ay ka dhigan tahay in ay suurogal tahay in lacag dheeraad ah lagugu yeesho. Sidoo kale, waxa aad geli kartaa gorgortan si hantida dib laguugu soo celiyo. Waxa aad weydiisataa haddii ay yareynayaan lacagta ay kugu leeyihiin haddii aad u soo celiso hantida. **Heshiis kasta oo aad gaartaan waa inuu noqdaa mid qoraal ah.** Waa in uu leeyahay oo adiga iyo deyn bixiyaha aad saxiixdaan. Nuqul (koobi) ka reebo.

- **Dhinaca xun** - haddii aadan ogoleyn in aad soo celiso hantida waxa ay maxkamadda ka diiwaangelinayaan dawcad ay hantida ay ku soo ceshanayaan. Dacwad maxkamadda laga diiwaan geliyo waa mid wanaagsan haddii aad heysato difaac sharci ah hantida dib lagaaga noqday ama deynta. Dhibaatada ay arrintani leedahay waa deyn bixiyaha oo adiga dusha kaa saari kara kharashka kaga baxa dacwadda. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in ay suurogal tahay in lacag dheeraad ah lagugu yeesho.

Haddii aad go’aan ku gaarto in aadan celin alaabada, ku adkeyso si ixtiraam leh. Ha gelin dagaal hana geysan wax handadaad ah. Si cod dheer ah ku dheh “Anigu waan diidanahay. Fadlan ka tag! Ha taaban gaarigeyga” Haddii aad dhib kala kulanto, u yeer booliska. Qor waxa meesha ka dhaca.

## Maxaa dhacaya ka dib marka ay dib u qaataan?




- Way iibin karaan hantida kuna bixin karaan deyntaada. Qiimaha lagu iibinayo waa inuu noqdaa mid “qiime ahaan suurogal ah” Taasi waxaay ka dhigan tahay in qiimuhu mid ku haboon yahay, laakiin aanu noqon mid aad u hooseeya. **Waa in ay ku soo wargeliyaan xilliga iyo goobta lagu iibinayo.**


- Deyn bixiyuhu waa inuu kuu soo diraa waraaq iibka ka hor iyo ka dib. Warqadda hore waxa ay kuu sheegeysaa goorta, goobta iyo sida gaariga loo iibinayo. Waa in sidoo kale laguu sheegaa inta aad bixin karto si aad dib ugu hesho gaariga. Hantidaada dib ayaad u soo ceshan kartaa adiga oo bixinaya deynta iyo qiimaha deib u soo cesashada. Waxaa kale oo suurogal ah in aad kala shaqeyn karto qorshe aad si tartiib tartiib ah lacagta ku bixiso.

- Warqadda labaad waxaa laguu soo dirayaa iibka ka dib. Waa in lagu wargeliyaa inta gaariga lagu iibiyey iyo haddii weli lacag kugu leeyahay deyn bixiyaha.

- **Fiiro gaar ah:** Inta badan, waxa ay isticmaalaan iibiye gaar ah. Haddii ay tahay iibin gaar ah, waa in lagu soo wargeliyaa xilli suurogal ah taariikhda la iibinayo.

- Mararka qaarkood deyn bixiyaha wuu heysan karaa alaabada oo ka noqon karaa iibka. LAAKIIN sidaas ma yeeli karaan haddii aad bixisay 60% ama ka badan qiimaha iibka. Waa in ay marka hore ku soo wargeliyaan. Haddii aad u heysato in iibinta hantida laga helayo lacag ka badan tan ay kugu leeyihiin, waad diidi kartaa 30 maalmood iibinka alaabada. Tani waa mid khatarteeda leh, la tasho qareen marka hore.

## Deyn bixiyuhu weli dacwad ma ii qabsan karaa?



Mararka qaarkood, Haddii ay kugu leeyihiin lacag ka badan tan ay ka helaan iibka, waa ay kugu dacweyn karaan faraqa haddii heshiiska deynta ee aad saxiixday uu sidaas dhigayo. Laakiin sharciga gobolka waxa auu dhigayaa in aysan sidaas yeeli karin haddii ay deyntu aheyd $7,200 ama wax kar sida ay ku bilaabatay deynta. Waxaa kale oo laga yaabaa in aad heysato difaacyo kale, sidaa darteed la tasho qareen haddii lagu dacweeyo.

## Maxaa yeelayaa haddii xuquuqdeyda lagu xad gudbay?

Haddii aaminsan tahay in deyn bixyuhu jabiyey sharciga, raadso caawinaad xagga sharciga ah. Haddii uu dakhligaagu yar yahay, la xiriir xafiiska Legal Aid. Haddii uu deyn bixiyuhu jabiyey sharciga, waxaa suurogal ah in aysan ku guuleysan xukun maxkamadeed. Waxaa kale oo suurogal ah in aad dacwad ku soo oogi karto oo magdhaw lacageed lagaa siin karo ama hantidaaada laguu soo celiyo.

Hay'adda Qaranka U Doodayaasha Macaamiisha.
www.consumeradvocates.org/find-attorney

*__Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.__ Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2022 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**